



WARBIXIN: TABABARKA SHIRKADDAHA WAXSOODEJINTA IYO DHOOFINTA EE FURDOOYINKA SOOMAALIYA (MUQDISHO)

12, July 2023.

Hordhac.

Furdooyinka Soomaaliya oo mar walba u heelan in ay tayeeyaan dhamaan shaqaalaha ka hawlgala Furdooyinka kala duwan ee dalka, ayaa soo qabanqaabiyay tababar kusaabsan kobcinta fahanka, ku shaqaynta iyo dhaqan galinta nidaamka casriga ah ee SOMCAS.

Kor u qaadista tayada xirfada dalaaliinta ka hawlgala dhamaan Furdooyinka Soomaaliya gaar ahaan Furdooyinka Caasimada Muqdisho waa mid udub dhexaad u ah habsami u socodka shaqooyinka sida maalinlaha uga dhex socda Furdada Dekedda Muqdisho iyo Furdada gegida garoonka diyaaradaha Muqdisho.

Fahanka iyo ku dhaqanka nidaamka casriga ah ee SOMCAS ayaa waxa looga baahan yahay dhamaan dalaaliinta ka shaqaysa Furdooyinka dalka gaar ahaa Furdooyinka Muqdisho in ay si hufan u fahmaan adeegsiga nidaamka casriga ah ee SOMCAS.

Nidaamka casriga ah ee Somali Customs Automated System (SOMCAS) waa nidaam horumarsan oo si xawaare iyo sugnaan u dardargalinaya shaqooyinka kala duwan ee ka dhex socda Furdooyinka dalkeena.

Nidaamka Casriga ah ee SOMCAS waxa uu si dhamaystiran u dhaqan galay 15, July 2023. Nidaamka casriga ah waa nidaam la jaanqaadi kara nidaamyada lagu maamulo Furdooyinka Wadamada horumaray, waana nidaam casri ah oo ay si wada jir ah u iskugu waafaqeen Somaaliya, ururuda qaramada midoobay (UN), ururuda Furdooyinka aduunka oo loo soo gaabiyo (WCO) iyo Dawladaha EU-da oo qayb ka ah hirgalinta nidaamka casriga ah.

Ujeedka Tababarka.

Nidaamka Casriga ee SOMCAS oo ah nidaam horumarsan oo casri ah ayaa waxaa laga maarmaan ay u tahay in la tababaro lana fahansiiyo dhamaan shaqaalaha ka hawlgala furdooyinka Soomaaliya. Si loo helo shaqaale tayeysan isla markaana shaqooyinka ay hayaan ugu dabaqaan xirfadooda ayaa waxa ay Furdooyinka Soomaaliya soo qaban qaabiyeen Aqoon kororsi loo samaynayo dhamaan dalaaliinta ka hawlgala Furdada Dekedda iyo Furdada Gegida diyaaradaha Muqdisho. Hadafyada laga leeyahay tababarkan ayaa kala ah:

- ◇ Xirfad kobcin: In kor loo qaado xirfada adeegsiga nidaamka casriga ah ee SOMCAS dhamaan dalaaliinta iyo shirkadaha ka hawlgala Furdooyinka Soomaaliya gaar ahaan muqdisho.
- ◇ Isticmaalka SOMCAS: In la tuso sida ugu haboon ee loo adeegsado nidaamka casriga ah ee SOMCAS.
- ◇ Shuruucda iyo Xeerarka: Fahansiinta Shuruucda iyo Xeerarka kaladuwan ee Furdooyinka Soomaaliyeed.
- ◇ Marxaladaha Nidaamka SOMCAS: In lagu baraarujiyo marxaladaha kala duwan ee uu marayo nidaamka casriga ah ee SOMCAS.

Nooca Tababarka.

Tababarkan oo daba socday tababaro hore loogu sameeyay shaqaalaha kala duwan iyo dalaaliinta Shirkaddaha ee ka hawl gala furdooyinka dalka gaar ahaan Furdooyinka Muqdisho, ayaa tababarkan diirada lagu saaray xafiisyo gaar ah, sida xafiiska **Declarationka**, xafiiska **Manifestaha** iyo sida ugu haboon ee loo jaangooyo **Canshuuraha** ku waajibaya muwaadinka, isaga oo ka mas'uula badeecaddiisa.

Gunnaanad

Furdooyinka Soomaaliya waxa ay mar walba u heelan yihiin ka jawaabida dhamaan baahiyaha shaqo iyo farsamo ee ay qabaan dalaaliinta iyo shaqaalaha ka hawl gala dhamaan Furdooyinka Soomaaliya.

Diyaarinta tababaro kor loogu qaadayo xirfadaha aasaasiga ah ee u baahanyihiin dalaaliinta iyo shirkadaha ka hawl gala dhamaan Furdooyinka dalka ayaa ah muhiimada ugu wayn ee ay leeyihiin Furdooyinka Soomaaliya.

Tababarkan intii uu socday waxa ay dalaaliinta shirkaduhu su'aalo waydiiyeen tababarayaashii soo qabanqaabiyey tababarkan. Su'aalahaasi oo iskugu jiray kuwo xeerarka furdooyinka la xiriiira iyo kuwo ku saabsan adeegsiga hufan ee nidaamka casriga ah ee SOMCAS, Tababarayaashu waxa ay si hufan oo dheeli tiran uga jawaabeen dhaman su'aalihii ay qabeen dalaaliintu.

-----Dhamaad-----